

Tixraac: SSC/WM/XW/XN005/2024

Taariikh: Janaayo 1, 2025

XEER-NIDAAMIYAHA CASHUURTA MACAASHMACAASHKA GANACSIGA

Isagoo fulinaaya mid ka mid ah ujeeddooyinka lagu sheegay Qodobka 2(4) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, ee la xiriira dabagalka dakhliga;

Isagoo u hoggaansamaya mabda'a lagu sheegay Qodobka 3 (7) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda & hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo waxku'ool ah;

Isagoo gudanaya awoodaha lagu siiyey Qodobka 9(1) ; ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, ee tilmaamaya in Wasiirku soo saari karo xeerhoosadyo, tilmaamayaal iyo hagayaal ka farcama xeerka Maamulka Maaliyadda Guud.

Isagoo gudanaya awoodaha lagu siiyey Qodobka 88(1) ee Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, ee tilmaamaya inuu soo saarayo Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqangel& sharciyada dakhliga;

Markuu arkay Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, & Xeerka Tacrifadda Cashuuraha Berriga;

Wasiirka Maaliyaddu wuxuu soo saaray **Xeer-Nidaamiyaha Cashuurta Macaashmacaashka Ganacsiga:**

Qodobka 1aad:
Ujeeddada Xeernidaamiyaha

- Xeernidaamiyahan waxa uu dejinayaa habraaca cashuureed ee lagu maamulayo dakhliga ka soo baxa kirada guryaha iyo dhismayaasha, si loo xaqiijiyo cadaalad, daahfurnaan, iyo kor u qaadista dakhliga dowladda.

Qodobka 2aad:
Awood Sharciyeed

1. Xeerndaamiyahan waxa uu ku saleysan yahay:
 - a. Xeerka Cashuuraha Berriga ee Dowladda SSC-khaatumo
 - b. Xeerka Maamulka Maaliyadda Dowladda SSC-Khaatumo
 - c. Xeerka Cashuuraha Dakhliga guud ee Qaranka

Qodobka 3aad:
Erayo Bixin

- **Macaashka Kirada:** Dakhliga soo gala mulkiilaha ka dhashay kirada dhisme ama guri.
- **Mulkiile:** Qof ama hay'ad leh xuquuqda dhisme ama guri, kana helo dakhli kiraysi.
- **Kirayste:** Qofka ama hay'adda heshiis kula jirta mulkiilaha si ay u degto ama u isticmaasho guriga.
- **Waaxda Cashuuraha:** Waaxda hoostagta Wasaaradda Maaliyadda ee qaabilsan uruurinta cashuuraha gudaha.

Qodobka 4aad:
Tacrifadda Cashuurta Dakhliga Kirada

Nooca Guriga	Qiimaha
Guryaha La Dego (Residential)	5%
Guryaha Ganacsi (Commercial)	10%
Guryaha Isku Darsan (Mixed Use)	Qaybwalba cashuurteed

Qodobka 6aad:
Diiwaangelinta Mulkiilaha

1. Mulkiilaha dhisme kiraysan waa inuu iska diiwaangeliyo Waaxda Cashuuraha isagoo bixinaya: caddeynta lahaanshaha, nuqulka heshiiska kirada iyo warbixin ku saabsan dakhliga la helay

Qodobka 7aad:
Xilliyada Bixinta

1. Bixinta cashuurta waxaa lagu bixiyaa sanadkiiba hal mar.
2. Warbixin sanadle ah waa in la soo gudbiyaa bisha Maarso ee sanadka xiga

Qodobka 8aad:
Kormeerka iyo Hubinta Xogta

1. Waaxda Cashuuraha waxay xaq u leedahay inay hubiso saxnaanta warbixinaha la soo gudbiyey ayadoo saraakiisha cashuuruhu sameyn doonaan booqasho xaqiiqo raadin ah.

**Qodobka 9aad:
Ganaaxyo iyo Cigaabo**

1. **Dib-u-dhac:** 2% bishii ee cashuurta la daahay
2. **Been-abuur:** Ganaax dhan 25% ee cashuurta la qariyey
3. **Iska Diiwaangelin la'aan:** Ganaax go'an oo dhan \$100

**Qodobka 10aad:
Cashuurdhaafis Sharciyeed (Exemptions)**

1. Waxaa laga dhaafi karaa cashuurta: guryo aan dakhliga laga helin, guryo si bilaash ah loo siiyey dad baahan (sida barakacayaasha), hantida dowladda ama hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn

**Qodobka 11aad:
Dibu-eegis iyo Beddelid**

1. Wasaaradda Maaliyaddu waxay xaq u leedahay inay dib u eegto heerarka cashuurta sannad walba iyadoo la tashaneysa Guddiga Miisaaniyadda.

**Qodobka 12aad:
Dhaqan-gal iyo Faafinta**

1. Xeeridaamiyahan wuxuu dhaqan galayaa marka uu soo baxo wareegto wasiirnimo, waxaana si rasmi ah loo faafin doonaa iyadoo lagu wargelinayo bulshada iyo milkiilayaasha.

**Qodobka 30aad:
Cashuurta Dakhliga Kiraynta**

1. Cashuurta dakhliga kiraynta waxaa laga qaadayaa kirooyinka uu cid kasta ka helo hanti guurto ama ma guurto ah. Shirkaduhu waxay soo caddaynayaan dakhliga ay ka helaan kirooyinka si waafaqsan Qodobka 53aad ee xeerkan.

**Qodobka 31aad:
Dakhliga Kiraynta Hantida**

1. Cashuurta dakhliga kirada waxay ku waajibtaa dakhliga ka soo gala kirada ee baabuurta, dhulka, dhismayaasha, iyo dhammaan qalabyada kale ee kiro gali kara.

**Qodobka 32aad:
Dakhliga Kiraynta Laga Dhaafay Cashuurta**

1. Ka dhaafitaanka cashuurta kiraynta wuxuu khuseeyaa:
 - a. Goobaha loogu talagalay cibaadaysiga.
 - b. Xarumaha qabuuraha.
 - c. Xarumaha ama dhismayaasha ay leedahay Dowladda.
 - d. Deegaannada ama dhismayaasha ay leeyihiin safaaradaha iyo qunsuliyadaha dowladaha iska leh ee ku yaalla gudaha Dowladda Puntland.
 - e. Guryaha ay leeyihiin Qaramada Midoobay iyo wakaaladahooda gaarka ah.

Qodobka 33aad:
Cashuurta Dakhliga Kiraynta

1. Heshiiska kirooyinka waa in uu noqdaa qoraal ay wada saxiixeen dhinacyada heshiiska, una maray nootaayo sharci ah. Nuqul ka mid ah heshiiskaas waa in loo gudbiyaa maamulka dakhliga 15 (shan iyo toban) maalmood gudahood.
2. Kirada waxaa loo bixin karaa bille, saddex-bilooddle, lix-bilooddle ama sannadle, iyadoo la eegayo heshiiska u dhexeeya kiraystaha iyo mulkiilaha.
3. Habka xisaabinta dakhliga kiraynta waxaa loo raacayaa si waafaqsan xeerkani.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda SSC Khaatumo

Saxeex: _____

